



# Hadal Qoraal Ka Imanaya Dugsiyada Dadweynaha Portland

Juun 25, 2021

Sidii aanu marar fara badan ula wadaagnay qoysaska iyo dadweynaha, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay rajeynayaan inay si buuxda dib u furayaan, sidii ay ardaydu shan maalmood fasaladoodu waxbarashadoodii ugu qaadan lahaayeen xilliga dayrta. Wuxuu aan sii wadaynaa rajooyinkaasi iyada oo aanu ka shidaal qaadaneyno wargalintii ay hore u sheegtay Waaxda Waxbarashada Oregon ee Qaab-dhismeedka Adkaysiga sanad-dugsiyeedka 2021-2022.

Had iyo jeeraale waxaa jira faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan furitaanka iskuulada ee xilliga dayrta iyo iyada oo faahfaahintaasi ayna ka mid tahay waxyabaha sida, tallaabooyinka badbaadadda ardayda aadka u da' yar ama aan awoodin inay qaataan tallaalka xanuunka COVID-19. Waxa aan sii wadi doonaa inaan wixii cusub idinla soo socodsiino marka aan soo dhammeystirno faahfaahinaha inta lagu jiro xilliga xaggaaga.

Waxaan sidoo kale dabcan sii wadi doonaa inaan la shaqeyno madaxda caafimaadka dadweynaha iyo bulshooyinka dhaqanadda u gaarka leh sidii aan u dhiiirigalin lahayn, korna u qaadi lahayn aqoontooda ku saabsan muhiimada inay qaataan tallaalka kaasi oo ka badbaadinaya xanuunka.

Waxaan qof kasta u rajeyneynaa inay todobaadkani oo cimiladu kulushahay inay ka badbaadaan kulaylka daran ayna ku ekaadaan goobaha qabow.